

Waaxda Ammaanka iyo Sugnaanta Dugsiyada Dadweynaha Denver - Talooyinka Ammaanka la Siiyo Waalidiinta

- Bar caruurta in ay isticmalaan siistemka saaxiibtinimada. Badanaa, ammaanka wuxuu ku badan yahay caruurta koox koox u socota. Cayaarta kooxda, ka hor iyo kaddib dugsiyada, waxay ku fiican yahiin barxadaha lagu cayaaro iyo agagaarka xaafadda.
- Ogaaw meesha caruurtaada ku sugan yahiin mar kasta. Bar in ay toos ahaan yimadaan guriga kaddib marka ay ka soo noqdaan dugsiyada. Marka la booqanaayo ama lala cayaaraayo asxaab, caruurta waa in ay mar kasta ku adkeystaan jadwalada waalidka ogolaaday. Ardaydaas raacda basaska dugsiyada waa in ay mar kasta baska uga dagaan meesha loogu talagalay in uu istaago.
- La cayaar caruurta adiga oo hoggaaminaaya si aad u bartid talaabadaha la qaado xagga ammaanka la xariira shisheeyaha. Bar caruurta in ay gadaal u qaadaan dhowr talaabo marka shisheeye soo abaaro; ka fogaaw ilaa inta gacanta gaarto kaddibna u orod meel ammaan ah.
- Waxaa wanaagsan in caruurta la baro ammaanka baddalkii lagu abuuri lahaa cabsi. Tusaale ahaan, in caruurta la baro in ay iska jiraan shisheeyaha waa in la siiyo isla muhiimadda ay leedahay sida fiirinta labada jiha marka la gudbaayo jidka iyo in aan lagu cayaarin taraq.
- Isgaarsiin fiican la samee caruurta si loo habsado in iyaga oo diyaar ah kuu sheegaan waxyaabaha aan caadiga ahayn ee dhaca.
- Hubso in caruurtaada xasuusato magacyada buuxa ee waalidiinta, cinwaanada, nambarada telefoonka, iyo meelaha laga shaqeeyo.
- La soco baabuurta aan la aqoonin ee ku noqnoqata xaafadda iyo qoro nambarada taargada.
- Iska ilaali in aad magaca cunugaada kor uga qortid labiska. Dhaqankaan wuxuu ku adkeeyaa shisheeyaha in ay la hadlaan caruurta iyaga oo si la yaqaan u isticmaala magacyadooda.
- Haddii cunugaada loo soo dhawaado, cunugga waa in la baro in uu qeyliyo "Aniga ma ihi cunugaada," ama "Adiga ma tihid waalidkeyga." Marar badan, caruurta waxay ilobaan in ay qeyliyaan.
- Guriga marka la joogo, daji sharciyada guriga, kuna adkeyso. Waa in la hirgeliyo sharciyada waqtiga cayaarta iyo booqashada guryaha deriska.
- Hubso in caruurta bartaan in ay aqoonsadaan dadka la aamino karo sida boliiska iyo dab damiska.
- Bar caruurta meesha ay ku yaalaan guryaha ama dhismooyinka ammaanka ah maxaa yeelay waa intaas ay caruurta u baahdaan in ay ku ordaan. Aqoonso deriska laga heli karo kaalmo marka aadan guriga joogin. Marka lagu jiro xaalad degdeg ah, caruurta waa in lagu waaniyo in ay ordaan guriga ugu dhaw si ay u helaan kaalmo. Bar caruurta in ay iska ilaaliyaan luuqyada iyo meelaha, guryaha, ama garaashyada banaan.
- Bar caruurta in "shisheeyaha" yahiin dad aan anaga aqoonin. Habka aqoonsiga waxaa ka mid ah qofka magaciisa si wanaagsan loo yaqaan, ku nool meel dhaw, ama qof ay yaqaanaan xubnaha kale qoyska.
- Waalid ahaan, xaji xariirka aad la leedahay dugsiyada, xarumaha xaafadda, iyo wakaaladaha hirgelinta sharciga. La soxo barnaamijyada aqoonsiga cunugga iyo barnaamijyada la socoshada ammaanka.

- Bar caruurta in qofna uusan taabanin qaar ka mid ah qeybaha jirkooda, iyo in ay isla markiiba soo sheegaan marka ay la kulmaan dabeecad aan wanaagsaneyn. Waalidiinta waa in ay si joogto ah u hirgeliyaan fikradaan.
- Waalidiinta iyo caruurta waa in ay samaystaan eray sir ah (password) kaasoo ay yaqanaan qoyska oo keliya. Caruurta waa in loo sheego in aysan raacin qof aysan aqoonin iyaga oo aan isticmaalin erayga lagu galo.
- Waalidiinta waa in ay ogeysiyaan dugsiga iyo boliiska haddii la kulmaan dhacdo, meel kasta ama waqti kasta.
- La soco waqtiyada kormeerka, dugsiga ka hor iyo kaddib, iyo iska ilaali in aad caruurta u dirtid dugsiga waqti hore ama in aad u ogolaatid in ay meelaha ku warwareegaan dugsiga kaddib.

Si loo helo waanada ammaanka, booqo www.ncpc.org.

Waalidiinta qabta Su'aalo ama Arrimo waa in ay la xariiraan Xaafadda Waaxda Boliiska Denver ee ku taala xafadahooda.

- Dagmada 1aad **Northwest Denver** 303-964-1111 303-964-1111 LACAG LA'AAN
- Dagmada 2aad **East Denver** 303-331-4070 303-331-4070 LACAG LA'AAN
- Dagmada 3aad **Southeast Denver** 303-698-3333 303-698-3333 LACAG LA'AAN
- Dagmada 4aad **Southwest Denver** 303-937-4444 303-937-4444 LACAG LA'AAN
- Dagmada 5aad **Northeast Denver** 303-376-2300 303-376-2300 LACAG LA'AAN
- Dagmada 6aad **Downtown Denver** 303-839-2100 303-839-2100 LACAG LA'AAN

Ama Waaxda Ammaanka iyo Sugnaanta Dugsiyada Dadweynaha Denver (Denver Public

Schools Safety & Security Department) ee laga helo telefoonka 720-423-3911 720-423-3911 LACAG LA'AAN.